



## Office of Safety and Security

889 E. 17<sup>th</sup> Ave  
Columbus, Ohio 43211  
Phone 614-365-5638  
Fax 614-365-8785  
[www.columbus.k12.oh.us](http://www.columbus.k12.oh.us)

*Mission: Each student is highly educated, prepared for leadership and service, and empowered for success as a citizen in a global community.*

15-ka Febraayo, 2020

Qoysaska Qaaliga ah ee Dugsiyada Magaalada Columbus,

Ku soo dhowaada dhismayaasha dugsigeena! Sidaad ogtahay, amniga gudaha dhismayaasha dugsigeennu waa mid kamid ah ahmiyadaha ugu sarreeya ee Dugsiyada Magaalada Columbus (CCS). Xafiiskeena Bad-qabka iyo Amniga waxaa ka go'an aqoonsiga maalgashi ee aaminka ah ee qaababka tiknooloojiyadda cusub iyo qalabka casriyeenta si loo ilaaliyo ardayda iyo shaqaalaheena.

Waxaan ku faraxsanahay inaan ku dhawaaqno inaan kor u qaadnay nidaamkeena maareynta soo booq-dayaasha oo aan gaarsiinnay madal (qorshe) cusub. Nidaamka amniga dugsiga ee maamulka maaraynta soo booqdaha (Raptor 6) wuxuu badalayaa nidaamkii hore ee amniga soo booqdaha (LobbyGuard system) ee dhamaan dugsiyadeena CCS. Qorshahan (barnaamijkan) cusub wuxuu siin doonaa Degmadeena adeegsi waayo-aragnimo sare loo qaaday, sifoojin dheeraad ah (astaamo dheeri ah), iyo kor u qaadista muuqaalka (aragga) iyo maaraynta awoodaha maamulka degmada oo dhan Aad ayaan ugu faraxsanahay cusbooneysiintan waxaana aaminsanahay inaad sidoo kale aad ku qanci doonto kor u qaadista amniga cusub.

### SIDEE AYEY U SHAQAYN DOONTAA?

Soo-booqdayaasha waa iney is-ka qoraan xafiiska weyn ee dugsiga waxayna u baahnaan doonaan inay saxiixaan oo ay soo bandhigaan aqoonsi (sida teesaraha (Shatiga) Wadista ama Kaarka Aqoonsiga Gobolka). Nidaamka Maareynta Booqdaha (Raptor 6) wuxuu marin doonaa (iskaan-gareyn doonaa) macluumaadka aqoonsiga ee teesaraha. Macluumaadka Aqoonsiga waxaa laga hubin doonaa kaydka xogta qaran ee dambiilayaasha galmaada ee diiwaangashan iyo macluumaadka dugsiga lagu qoray ee dadka (shakhsiyaadka) lagu soo bandhigay digniinta inay ka fogaadaan aagagga la haanshaha dugsiga. **Haddii aadan haysanin laysinka (teesaraha) darawalnimada, fadlan soo qaado nooc kale oo ah aqoonsi sawir leh oo sax ah ama la xiriir shaqaalaha xafiiska dhexe ee dugsiga ka hor intaadan imaanin.**

Haddii aysan jirin wax calaamado oo la mid ah oo la helay, calaamadda booqdaha ee cadaynta isaga/iyada ayaa daabacanaya/ doonta si dhakhso leh si dhammaan loogu aqoonsado martida dhismaha. Markuu ogolado (ansixiyo), nidaamka amniga (Raptor 6) wuxuu xasuusan doonaa magacaaga iyo sawirkaaga si loogu adeegsado mustaqbalka. Soo booqde kasta oo aan xirneyn calaamadda booqdaha (badge-ka) waxaa loo kaxayn doonaa xafiiska weyn ee dugsiga.

Waxaa xusid mudan; Calaamadan (Astaantan) cusub ee amniga ma beddeleyso kormeeraha qiimaha leh ee xoghayeyaasheena dugsiga, shaqaalaha xafiiska hore, iyo maamuleyaasha dhismaha, kuwaas oo sida ugu fiican u yaqaan cidda ay tahay iyo inaysan joogin dugsiga ilmahaaga.

Waxaan ka mahadcelineynaa taageeradaada joogtada ah iyo iskaashiguba inay muhiim u yihin ka caawinta sidii loo ilaalin lahaa bad-qabka (nabadgelyada) dugsiyadeena loona dhiirrigelin lahaa deegaan (jawi) wanaagsan oo ah dugsi ku habboon waxbarashada iyo koritaanka.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan wac Xafiiskeena Xiriirka Macaamiisha oo ah 614-365-8888 ama ka gal bogga degmada ee ah [www.ccsdoh.us](http://www.ccsdoh.us) oo guji bogga Bad-qabka iyo Amniga ee ka hooseeya furaha Waaxda (Departments tab). Shaqaalaha xafiiska dugsiga ilmahaaga ayaa waliba kaa caawin doona.